**JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMALIYA**

**MAXKAMADDA SARE EE DALKA**

MAGACA UMMADDA SOOMALIYEED

Ref:MS/20/2016BG Tr.18/07/2016

Ref:MS/71/2016BX

Fadhi ay qaadatay Maxkamada Sare iyadoo ka kooban Garsoorayaasha kala ah:-

1. Dr. Maxamed Maxamuud Maxamed ...........................Guddomiye
2. Dr.Sh.Cumar Aadan Maxamed ........................................Xubin
3. Dr.Sh.Abuukar Cismaan Macalin ....................................Xubin

Oo kaaliyey Maxamed Ibraahim Xaashi,dacwad Maamul ah ee ka dhaxeysa dhinac yada kala ah:-

1. Shaqaalaha Bankiga Dhexe ee Soomaliyeed oo ka kooban 51 Qof oo wakiil ka yahay Maxamed Xaaji Cali Maxamed (Qareeno) Avv: Tahliil Xaaji Axmed Avv:C/kariiin Maxamed Axmed Avv: Cusmaan Xasan Siyaad

Lid

2. Bankiga Dhexe ee Dawladda Qareen u ah Garyaqaanka Guud ee Dawladda

Doodii qareenada ee shaqaalaha Bankiga Dhexe ee Avv Tahliil Xaaji Axmed Avv:C/kariin Maxamed Axmed iyo Avv:Cusmaan Xasan Siyaad waxay dooda ku sheegeen inay ka cabanayaan dacwad idaari ah ee lid ku ah Bankiga Dhexe ee Soomaliya oo soo saaray qoraal sharci daro ah oo sumadiisu tahay GOV/10/274/2015 Ee 30/9/2015, iyadoo lagu wargaliyey in ay ka guuraan guryaha Bangaariyo ay daganaayeen ee Bankiga Dhexe, iyagoo sheegay doododa inay waafaqsan yihiin qoraalkooda sumad DID/1100/16 Ee Tr.19-Jan-2016, waxay sheegeen inay jiraan guryo milkiyadiisa ay leeyihiin shaqaalo Bankiga Dhexe ee Somaliya ee ku yaala Degmada Wadajir agagaarka Garoonka diyaaradaha Aadan Cabfdulle Cismaan oo ka kooban 54 guri, Bankiga Dhexe ee Soomaliya waxuu ka codsaday wasaaradaha Hawlaha Guud waaxda dhulk bixinta (department demanio) dhul baaxadiisu tahay 145000MQ in uu uga dhiso shaqaalihiisa 138 guri

sida ku cad faafinta rasmiga ah ee lm .5 ee 18 Maajo 1971 iyo faafinta rasmiga ah SUPPL.Raaca 2 ee lam 10 ee 16 Oktober 1971.

Maamulka wuxuu saraakisha Bankiga Dhexe la galay heshiis ijaar oo laga milkiyo guryahaas (kireeso oo yeelo ) (Rent to awn system).

Sida ay sheegeen qareenadaas shaqaalaha Bankiga Dhexe hantida laga dhisay guryahaas waxay ahayd lacagta laga jaro mushaharka shaqaalaha (pension fund).

21 qodob ee xeer nidaamyada ayaa sheegaya guryaha lawada dago ee shaqaalaha Bankiga Dhexe ay ku milkiyeen wuxuu si cad u qeexayaa xataa in la iska dhaxli karo sida ku cad Qod. 1aad amarka fulinta ee uu qoray Guddomiyaha Bankiga Dhexe soo baxay 01-Feb -2007dii, wuxuu si cad u aqoonsaday in milkiyadaas guryaha Bankiga Dhexe ay leeyihiin Saraakiisha Bankiga Dhexe, sharcina ulahayn madaxda Bankiga Dhexe inay ka saaraan saraakisha Bankiga Dhexe,waayo waxay shaqaalahaas ku milkiyeen sifo sharci ah iyagoo ku milkiyey haafeenkii bilaha ahaa ee laga jarijiray muddo dheer ay deganaayeen, taasoo macnaheeda uu yahay lacagta lagu dhisay guriyaha bankiga dhexe in ay leeyihiin shaqaalaha balse uusan lahayn Bankiga Dhexe.

Qareenada shaqaalaha Bankiga waxay sheegen saldhigooda qaanuuneed ee Dacwada in uu yahay go'aanka Bankiga Dhexe ee lr.52 ee Jan-1990 oo qeexaya ku wareejinta guryahay shaqaalaha bankiga Dhexe ee Soomaliya iyo madaxda sare ee Bankiga hogaaminaysay.

In shaqalahaas ay buxiyeen shuruudihii heshiiska kuna bixiyeen bil kasta mushaharkooda gunadiisa laga jarijiray, sida ku cad Qod.144XMS heshiiska dhinacyada isla galaan waa sharci.

Heshiiska dhexmaray shaqaalaha Bankiga Dhexe iyo Baanka Dhexe waxaa loo cuskaday Xeerka Madaniga ee Talyaaniga maadama markaas uu san jirin Xeer Madani Soomaliyeed .

Dhinacyada sida ku cad, waafaqsan Qod.427XMS, oo xeerinaya in dhinacyada ay ku heshiin karaan shuruud la'aan oo qiimaha haaf logu bixinayana la dhamaystirayo.

Qareenada waxay sheegen in ay sharci daro tahay iyo gabood fal awoodeed sharcigana aan waafaqsanayn go'aanka guri ka saarida ee guddomiyaha Bankiga Dhexe iyo Madaxda Sare ee Bankiga Dhexe.

Waxay codsadeen

1. In si degdeg ah loo baabi'iyo qoraalka sharci darada ee sumadiisu tahay GOV.-10-274-2015 Ee ka soo baxay Godoomiyaha Bakiga Dhexe ee Soomaliya lagana hanta guurinaayo saraakiisha Bankiga Dhexe ee Ee Milkiyey.
2. In la cadeeyo shaqaalaha Bankiga Dhexe in sifo sharci ah ay ku milkiyeen guryaha Bankiga loona gacan baneeyo.
3. Sida ku cad Qod.302-303XHMS,inta dacwada socoto ay Maxkamadda Sharafta leh soo saarto amar deg deg ah oo lagu joojinaayo ka saarida iyo ka hor istaagida sharci darada ah ee shaqaalaha Bankiga guryaha ay ku milkiyeen si sharci ah.
4. In dusha laga saaro kharashka dacwada iyo xushmada qareenada lagana saaro Bankiga Dhexe ee Soomaliya.

Jawaabtii Garyaqaanka Guud ee Dawladda iyagoo difaacaya Bankiga Dhexe ee Soomaliya kana soo horjeeda dacwada idaariga ee loo haysto Bankiga Dhexe ,dacwadaas ay ku soo oogeen qareena ay ka mid yihiin Avv: Tahliil Xaaji Axmed.Dr. C/kariin M.Axmed iyo Dr. Cusmaan Xasan Siyaad oo u dacwoonaya shaqaalaha Bankiga Dhexe ee Soomaaliyeed oo gaaraya 51 qof iyadoo wakiil ka yahay Maxamed Xaaji Cali Maxamed .

Garyaqaanka Guud Ee Dawladda wuxuu sheegay jawaabta in ay la xariirto dacwad ay soo baareen qareenada shaqaalaha Bankiga iyadoo loogu doonayo laga ijaaray guryaha Bankiga balse ay ku doodayaan in ay milki u leeyihiin taasoo ka soo horjeeda heshiiskii ay isla gaareen shaqaalaha Bankiga iyo Bankiga Dhexe, Garyaqaanka Guud waxa uu sheegay guryaha ku yaala Degmada Wadajir agagaarka garoonka diyaaradaha ee Aadan Cabdulle Cismaan cabirkiisuna yahay 145000mq waa guryo Milkiyadeedu leeyahay Bankiga Dhexe ee Soomaliya 149 sida ku cad Digreeto NO.132 ee 28-Abril-1971dii mana jirto cid bankiga ku wareejiyey ama lacag u celisay guryahaas, mana jirto wax milkiyad ah ay ku

yeelanayaan shaqaalaha, go'aanka ay soo saareen madaxda Bankiga waa mid ay u dhanyihiin shurudahooda oo dhan haday ay ahaan lahayd ikhtisaaska ujeedada habraaca iyo hadafka laga lahaa soo saaristiisa, sida ku cad qodobka 11aad ee Garsoorka go'aanada maamulka waxaa lagu dacweynkaraa muddo 30 maalmood gudohood iyadoo loogu dacwoonayo Maxkamadda Sare ee marka la gaarsiiyo dhinaca kale iyo dhinaca naga soo horjeeda ay muddadii ka dhamaatay, waaxanu soo jeedinaynaa in ladiidao cabashadooda.

Garyaqaanka wuxuu soo bandhigay qaabka heshiiska ay u wada galeen ,agaasime ku xigeenka Bankiga Smilio gainnini oo ka wakiilk ahaa Bankiga Dhexe iyo kireeste Cali Maxamed Ibraahim iyo qaabkii u dhacay heshiiskaas, garyaqaanka waxa uu sheegay kireestaha in uu dib ugu soo celinayo Baanka hadii ay joogsato shaqaalanimadiisa iyo in uu san kireen Karin, wuxuu sheegay Garyaqaanka in la samayn doono xeer qabyo qoraal ah oo lagu nidaaminayo qaabka dadka guryaha kiraystay ugu celin lahaayeen qiimaha guryaha.

Garyaqaanka Guud waxa uu tusaale usoo qaatay Prof:Maxamed Xasan Muuday oo u wareegay Jaamacada ummadda kana guuray guryaha uu daganaa ee Bankiga markii uu ka wareegay Bankiga,waxa kale uu u soo qaatay Garyaqaanka dad u guuray dibada iyo dad geeriyooday iyo dad u wareegay xafiisyo kale sida Cismaan Xaaji Yuusuf.

Garyaqaanka Guud Ee Dawladda wuxuu sheegay in go'aanka saldhiga looga dhiga dacwadaan ee LR 52 Ee 10-Janaayo 1990kii laguna sheegay in uu dhaqangalayo uu yahay been abuur kana hor imanayo Xeerka iyo nidaamka Bankiga lagu maamulo isagoo codsaday Garyaqaanka in la baabi'iyo go'aankaas baadilka ah oo aan lahayn astaanka go'aanada maamulka iyo sheegashada lagu doonayo in la boobo xoolaha Qaranka 2015 ee soo baxay 30-09/2015 oo ah go'aan maamul oo sharciga waafaqsan isla markaana dhaqangalay oo ayna cabasho ka furnayn iyo dhinaca kale in lagu xukumo kharashkii dacwada iyo xushmada qareenka.

## ASBAABTA XUKUNKA

**Maxkamadda Markey dhagaysatay** : doodii dheereed ee dhexmartay qareenada Avv.Tahliil Xaaji Axmed Dr.C/kariin Maxamed Axmed Dr. Cismaan Xasan Siyaad iyagoo qareeno u ah shaqaalaha Bankiga Dhexe ee Soomaliyeed oo

wakiil ka yahay Maxamed Xaaji Cali shaqaalahaas oo tiradooda dhan 51 qof doodana ku salaysnayd Go'aan ka soo baxay Goddomiyaha Bankiga Dhexe ee Soomaaliya Bashiir Ciise oo soo saaray Go'aan lam tixraac Gov-10-274-2015, iyagoo ka cabanaya ka saarista guryaha Bankiga ee Muwakilintooda iyo doodii garyaqaanka Guud uu ku difaacayey Go'aanka ka soo baxay Guddomiyaha Bankiga Dhexe ee Lam tixraac Gov-10-274-2015 ee 30/9/2015 isagoo sheegay guryahaas in uu sii yahay Bankiga Dhexe shaqaalahana ijaar ugu jiraan ayna ka baxayaan marka loo baahdo.

**Markey aragtay :**qoraalada faraha badan balse nuxurkooda uu ka kooban yahay iyo qolo kasta waxa ay daliishatay .

**Markey daristay :**qodabada ama go'aanada saldhiga u ah doodooda sida Go'aanka uu soo saaray Guddomiyaha Bankiga Bashiir Ciise ee ku taarikhaysan 30/9/2015 iyo sharci lam 245 taarikhdiisuna yahay Sebtember 21/1971ee Dawlada ku siisay Bankiga Dhexe ee Somaliyeed dhulka ku yaala Degmada Wada jir si loogu dhiso guryaha shaqaalaha Bankiga Dhexe iyadoo lagu maalgalinayey lacagta kaydka u ahayd shaqaalaha Bankiga markey hawlgab noqdaan (fondo pensione del personale) taas oo macnaheeda yahay lacagta lagu dhisay guryaha ay lahaayeen shaqaalaha ee uusan lahayn Bankiga.

**Markey aragtay :**heshiiska Febraayo 1-1966 oo ay wada saxiiseen Bankiga Dhexe ee soomaliya iyo shaqaalihii oo si qayaxan u cadeynaayo habka loogu wareejin doono shaqaalaha Bankiga Dhexe ee soomaliya kadib markey u shaqeeyaan Bankiga mudo 20 sano ah.

**Markeya aragtay:** dokumintiga ka kooban 21ka qodob oo qeexaya shuruudaha loo dejiyey isticmaalka guryaha shaqaalaha Bankiga Dhexe ee Soomaliya ee ku taarikhaysan 2-2-1966.

**Markey aragatay :**go'aanka Bankiga Dhexe ee Lr52 taarikhdiisuna tahay Janaayo 10-1990 oo qeexaya ku wareejinta guryaha shaqaalaha Bankiga Dhexe ee Soomaliya iyo madaxda sare ee Bankiga hogaaminaysay.

**Markii la garwaaqsaday** in loo baahan yahay in ay tahay in si deg deg ah loogu wareejiyo milkiyadda guryaha iyo sidii loo ilaalinlahaa hantidaas iyadoo tixgelin gaar ah la siinayo xuquuqda shaqaalaha guryahaas mutaysatay iyo heshiisyada guryahaas lagu siiyey.

**Markey la hubsaday:** in shaqaalahaas ay buuxiyeen shuruudihii heshiiska muddda hawl gabka iyo soo celinta qaybtii lacag soo celinta ayagoo muddo bil kasta mushaharkooda iyo gunadooda laga jari-jiray.

Waxaa la go'aamiyey shaqaalaha Bankiga Dhexe ee Soomaaliya in si rasmi ah ee sharciga waafaqsan loogu wareerjiyo guryaha Bankiga Dhexe,go'aanka wuxuu ku dhaqan galay heshiisyada iyo go'aanadii hore ,wareegtadan waxaa ku saxiisan Guddomiyah Bankiga Dhexe ee Soomaliya waxayna ku magacaabantahay fulin goaanadu guryaha shaqaalaha,waxaana u saxiixay Guddomiyah 1da Febraayo 2007.

**Markey aragtay Maxkamadda** :in uu Guddomiyaha Bankiga dhexe ee Soomaliya uu saxiisay labada Go'aan ee isk hor imanaysa ee kala ah, go'aanka ay ka cabanayeen qareenada u doodaya shaqaalaha ee ku taarikhaysan 30-9-2015 uu soo saaray Bashiir Ciise iyo wareegtada fulin go'aanada guryaha shaqaalaha ee u ogalaanaysa shaqaalaha in ay deganaadaan guryahaas maadama laga jarayey lacagtooda hawlgabka iyadana waxaa soo saaray Guddomiyaha Bankiga Dhexe ee Somaliya Bashiir Ciise 1da Febraayo 2007.

**Markey aragtay:**garyaqaanka Guud uu been abuur ku sheegay wareegtada uu soo saaray 1dii Febraayo 2007 Guddomiyaha Bankiga oo ah fulin go'aanada guryaha shaqaalaha balse uusan cadayn been abuurka uu ku sheegay wareegtadaas, markuu Garyaqaanka sheegay in uusan waxba qabin in ay shaqaalaha Bankiga cidii loo aqoonsado inay degto guryaha Bankiga.

**Markey aragtay:**cadaymo dhawr ah ay sameeyeen Guddomiyaha Bankiga Soomaaliyeed Bashiir Ciise iyo Guddomiye ku xigeenka Bankiga Dhexe Maryan C/llahi Yuusuf ay codsanayaan in guryaha Bankiga lagu wareejiyo shaqaale hore uga shaqayn jiray loona baneeyo guryahooda.

**Markey aragtay**: Qod. 78-79-80XHMS sidaas darteed Maxkamadda waxay xukuntay iyadoo cuskanaysa asbaabaha kor ku xusan :-

1. Waxaa la baabiyey go'aankii guddomiyaha Bankiga Dhexe tixraac gov-10-274-2015 ee 30/9/2015.
2. Maxkamadda waxay xukuntay in shaqaalahii bankiga dhexe oo sida xeerka qabo loogu aqoonsan yahay guryaha shaqaalaha Bankiga dhexe aan laga saari Karin, sidaa darteed Maxkamadda waxay amraysaa in lagu celiyo Guryahooda.
3. Waxaa kharashka dacwada iyo xushmadii qareenka dusha laga saaray Bankiga Dhexe ee Soomaliya.

Guddiga Garsoorka Maxkamadda Sare

1. Dr. Maxamed Maxamuud Maxamed ....................Guddomiye---------------
2. Dr.Sh.Cumar Aadan Maxamed ................................Xubin---------------
3. Dr.Sh.Abuukar Cismaan Macalin .............................Xubin---------------

Kaaliyaha Maxamed Ibraahim Xaashi ..........................................................

MAXKAMADDA SARE EE DALKA
المحكمة العليا
SUPREME COURT